



## Casharo taxane ah iyo filim diirada saaraya kala duwanaanshaha bulshada

Bandhiga filimka *I Am Not Your Negro* ayaa noqon doona munaasabadii filinkii ugu horeeyey ee sanad-dugsiyeedka 2017-2018 ay soo bandhigaan casharo taxane ah iyo Kala Duwanaanshaha Bulshadu, kuna mudeysan maalinta khamiista, Sebtember 21keeda, saacadaha u dhaxeeya 5:00 galabnimo ilaa 7:00 habeenimo, goobtuna waa BESC qolka Golaha, cinwaanka 501 N. Dixon, 97227.

Intii lagu gudo jiray sanadkii 1979, James Baldwin wuxuu warqad u qoray wakiilkiisii qoraalka uu ku sharxaya waxa uu noqonayo mashruuciisa labaad, Xusuuso Gurigani (Remember The House). Buuggu wuxuu ahaa mid xambaarsan kacdoon siyaasi ah, kana waramaya noloshu ashkhaas iyo dilal qorsheynaa oo lagu fuliyey si is-xigta saddex ka mid ahaa saaxiibadiisii aadka ugu dhawaa—Medgar Evers, Malcolm X iyo Martin Luther King, Jr. Sanadkii 1987 oo ahaa waqtigii uu geeriyoonayey Baldwin, wuxuu ka tegay qoraal dhammeystiran ah oo ka kooban 30 bog. Hadda, dukumentariga cusub ee xiisaha leh, filim sameeyaha weyn ee Raoul Peck wuxuu suureynayaa buugga ma dhammaado James Baldwin. Natiijadu waa mid aasaasi ah, falanqeynta jinsiga casriga ee Maraykan, iyada oo la isticmaalayo erayadii asalka ahaa ee Baldwin iyo qoraalo tiro badan oo luxdan lagana helay rugta kaydka qoraalada. Ma ahi Ninkii Madoobaa ee aad Lahayd (*I Am Not Your Negro*) sooyaalkii hore ee taxanaha dhaqdhaqaaqa Xuquuqda Shacabka dadka madow iyo dhaqdhaqaaqa maanta ee “Qiimo Ayey Leedahay Noloshu Dadka Madow” (*Black Lives Matter*). Waa filim su’aalo ka qaba tirada madowga matasha ee joogta iyo kuwa kale oo ka baxsanba. Haddaba ugu dambeyntii, waa mid jilibka u dhigaysa xiriirada qotada dheer ee ka dhaxeeyey noloshii iyo dilalkii qorsheysnaa ee saddexda hoggaamiye kuwaasi oo ay Baldwin iyo Peck ay ka soo saareen shaqo u taagan sidii ay sharaxaad buuxda ugu heli lahaayeen waxa uu u taagan yahay wadanka Maraykan.

Casharada Taxanaha ah iyo Diirada Filimada Kala Duwanaanshuhu waa dadaal la rabo in la iskugu keeno shaqaalaha iyo bulshada sidii ay wada hadal uga yeelan lahaayeen ku saabsan jinsiga iyo dhaqanka. Kulanadii waxaa looga jeedaa sidii fahamkeenu u noqon lahaa mid gun dheer oo dhinaca jinsiga iyo dhaqanka raadna ku reeba bulshooyinka iyo ardeyda Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS).

Macalimiinta (shaqaalaha liisanka haysta) waxa suurtagal u ah inay helaan PDU ka qeybgalkooda taxanahaasi. Cunto iyo cabitaan fudud ayaa la idin siin doonaa.

Wixii su’aalo ah? La Xiriir Phu Dao ah ka mid ah xafiiska Iskaashiga & Sinnaanta halkani [pdao@pps.net](mailto:pdao@pps.net).